



[Bpl.org](http://Bpl.org)



Bogga Maktabada ee magaalada Boston waxaad ka heli kartaa macloomaad kala duwan. Degane walba ee gobolka Massachusetts wuu iska diiwaan gelin karaa maktabada si uu u helo kaadhka loo isticmaalo maktabada. Kaadhka waxaad u isticmaali kartaa inaad ku codsato buugaag, filimo, heeso, dejisatid buugta elegtaroonig ah ama inaad kala socotid dhacdooyinka xarumaha kala duwan ee maktabada.

Fariimaha soo socda waxaa hoos yaal sawiro, si uu kugu fududeeyo isticmaalka maktabada iyo kaadhka.

---

Halkaan ka bilow sida loo raadsho xarunta maktabada kugu dhaw. Guij bogga [Bpl.org](http://Bpl.org), ku dhufo “Visit” oo ka muuqata bogga dhanka sare, ka dibna ku dhufo “Branch Libraries”, sida sawirka ku xusan.


A screenshot of the Boston Public Library website's navigation bar. The bar is red with white text. It includes links for "About", "Visit", "Books &amp; More", "Services", "Summer Reading", "Support the BPL", and "Events". The "Visit" link is highlighted with a red box and has a black arrow pointing down to its dropdown menu. The dropdown menu lists "Branch Libraries", "Central Library", "Holiday Closures", and "Tours".

Laba wado ayaa lagu raadshaa maktabada kugu dhow.

A screenshot of the "Find a Location" page on the BPL website. The page has a red navigation bar at the top with the same links as the main site. Below the bar, the title "Find a Location" is displayed in large, bold, dark letters. There are two search input fields: one for "Find by address or ZIP code" and another for "Find by location name". Both fields have dropdown arrows. Below these fields is a map of the Boston area with several library locations marked. A legend on the map identifies "Map", "Satellite", "Reservations", and "Medford". Two arrows point from the text labels below to specific elements on the page: one arrow points to the "Search" button in the address field, and another points to the "Select a Location" dropdown in the location name field.

Ku qor lambarka xaafada (zip code)

Ama guji “select a location”, liiska kuu soo baxo ka xulo maktabada kugu dhow.



## Kaadhka Maktaba

Warbixinta khuseysa kaadhka maktabada iyo kuwa elegtarooniga aha, ku dhufo "Services" ka dib dooro "Library Card Registration" si aad u aragto qaabka kaadhka loo helo oo na loo isticmaalo.

## Kaadhka Madxfafka

Ma ogtahay inaad madxfafyo badan ku yaala magaalada Boston aad bilaash ku booqan kartid adigoo isticmaalaya kaadh madxfafka? Ku dhufo "Museum Passes" inaad warbixin dheeraad ah ka heshid.

## Catalog

Catalog

Website


FAQs

Events

## Isticmaalka Bogga Maktabada

Sida ugu sahlan loo isticmaalo bogga waa isticmaalka aalada raadinta, ee ku taala bogga qeybtiiisa sare.

Aalada raadinta waxeey sahashaa helista buugaag, bogag, su'aalaha badanaa dadweynaa qabaan ama dhacdooyin kala duwan. Ku dhufo halka ku qoran "Catalog" ka dibna dooro liiska kuu soo baxa.



Hadaad rabtid, waxaad raadinaysid waa soo koobi kartaa adigoo ka xulanaya liiska ku qoran "Keyword".

## Gelista Akontigaaga

Hadaad horey u sameysatay kaadhka matabada, gelista akontiga weey fududahay!

Sida sawirka ka muuqata, ku dhufo “Log in/ my BPL” ku taala qeybta midig sare, geli ama ku qor kaadhka nambarkiisa oo laga helo boga dambe ee kaadhka.

Tilmaamaha kuu soo baxa raac, si aad u dhameystirtid diiwaan gelinta akoontiga.

Log In / My BPL ▾

Log In

Username or Library Card Number :

PIN :

[Forgot your PIN?](#)

Remember me on this device

Log In

## Raadin

Hada, akoontiga waad gashay, waxaa raadin kartaa wax walbo oo aad rabtid inaad ka dalbato ama ka codsatid matabada.

Tusaale, hadaan doonayo inaan dalbado buuga “The Color Purple”, waxaa ka raadinya cinwaanka buuga sida “the color purple”:

Search the  by    Advanced Search

### Books

- Book (37)
- eBook (11)
- Paperback (9)
- Large Print (1)

### Audiobooks


- Audiobook CD (2)
- Streaming Audiobook (1)

### Movies & TV

- Streaming Video (10)
- DVD (2)

Waxaa kuu soo baxayo natijo badan. Waad soo koobi kartaa adigoo adeegsanaya qeybta ‘categories’ oo ku taala dhanka bidix ee shaashada.


Markaad heshid shayga aad rabtay, guji badhanka midabka cagaaran “Place a hold”, ka xulo matabada aa



rabto inaad ka qaadato buuga ama shayga kale aad codsatay, ka dibna guji “Confirm Hold”. Qaabka kor ku xusan waxaa kaloo loo adeegsan karaa sida lagu helo buugta elektarooniga aha, buugta maqalka iyo muuqaalka ah iyo heesaha.

### Boggoga Ku Xiran Maktabada

Maktabada Boston waxaad kaloo ka heli kartaa boggag bilaash ah adigoo isticmaalaya kaadhka maktabada.



### Macluumaad Dheeraad Ah

BPL waxaa ka heli kartaa macluumaad tiro badan. Kala soco macluumaadka adigoo guji-naya “Services” iyo hoos uga bax “Services by Audience”, ka dooro mida adiga ku quseysa, halkaana kala soco wax walba bogga maktabada laga heli karo.

**Hambalyo! Diyaar ayaad u tahay isticmaalka Bogga Maktabada ee BPL!!**